

Office of the WorkCover OMBUDSMAN South Australia

Xafiiska Ombudsman-ka ee WorkCover* wuxuu siiyaa talo lacag la'aana iyo caawimo shaqaalaha dhaawacu soo gaaro iyo loo-shaqeeyaha dacwada ka qaba sida loo bixiyey adeega Mashruuca WorkCover.

Waa xafiis madax banaan kaas oo baara dacwooyinka ku saabsan hawlaha Mashruuca WorkCover wuxuuna uga warbixiyaa Mashruuca Wasiirka Xiriirka Shaqaalaha.

Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Ombudsman-ka WorkCover adigoo

Ku wacaya	1800 195 202 Lacag la'aan
Fakis	(08) 8204 2169
Email	owo@saugov.sa.gov.au
Street Address	Level 6, Chesser House 91-97 Grenfell St ADELAIDE SA
Cinwaanka warqadaha	GPO Box 2343 ADELAIDE SA 5001
DX	DX 56201 ADELAIDE

Haddii aad doonayso inaad shakhsi ahaan ula hadasho shaqaalaha xafiiska, fadlan ballan samayso adigoo soo wacaya Xafiiska Ombudsman-ka WorkCover marka hore.

Doorka Ombudsman-ka WorkCover waa in:

- la hello, la baaro lana raadiyo xalinta dacwadaha ka imanaya shaqaalaha, loo shaqeyaha iyo qaybaha kale ee danaynaya wixii ku saabsan sida adeega looga bixiyo Mashruuca WorkCover.
- Waxay baaraan arrimaha la xiriira dhaqancelinta iyo ku soo celinta shaqada shaqaalaha dhaawacu gaaray, waajibaadka loo-shaqeeyaha, bixinta adeega dhaqancelinta, jebinta sirta, bixinta macluumaadka, iwm.
- Dib u eegida joojinta lacagta asbuucii la siiyo shaqaalaha dhaawacmay.
- Xusida dhibaatooyinka ka yimaada hawsha ama maamulka Dhaqancelinta Shaqaalaha iyo Xeerka Magdhabida ee 1986 (*Workers Rehabilitation and Compensation Act 1986*).
- Dhiirigelinta iyo caawinta WorkCoverSA iyo loo-shaqeeyaha si ay u asaastaan siday wax uga qaban lahaayeen dacwooyinka.

Ogsoonow: Haddii aad dacwad qabto waxaanu badanaa ku weydiisanaa inaad la xaliso cidada ay khusaysa marka hore ama ururka ka hor inta aadan u soo gudbin xafiiska WorkCover Ombudsman.

Haddii aad doonayso inaad la hadasho Xafiiska Ombudsman-ka WorkCover luqada aad adigu doorbidayso, fadlan wac Xarunta Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka (08) 8226 1990 weydiina in turjubaanku la hadlo Xafiiska Ombudsmanka oo ah 1800 195 202 (LACAG LA'AAN). Adeegaan tarjumidu wax lacag ah kugu kalifimaayo.

* Ombudsman-ku waa shakhsi loo magacaabay baarida dacwooyinka.